




ismaamulka san diego

# Warteena Biyaha ee Carlsbad

**Waraha biyuhu waa dhul  
soo jiita biyaha oo mara  
kanaallada, hawooyinka  
iyo wabiyada kadibna  
biyaha iskugu geeya meel  
godan – badanaa badda.**

Warta biyaha ee Carlsbad waa 1 kamid ah 11 warood ee biyaha ee ku dhix yaala Ismamaulka San Diego. Warta biyaha ee Carlsbad ayaa ka bilaabata bariga Escondido meel u dhow Harada Wohlford waxayna biyaha ku shubtaa ilaa Badwaynta Baasifiga ee marta Oceanside, Carlsbad, Encinitas, iyo Xeebta Solana. Haddii aad ku nooshahay aaga wartaan biyaha, talaabooyinka aad ku sameeyso gurigaaga iyo deegaankaaga ayaa naga caawin kara kor u qaadista tayada biyaha ku jira wabiyadeena, harooyinka, iyo badwaynta.

## Qariirada Warta Biyaha ee Carlsbad



**Waxaan ku tiirsan  
nahay warteena biyaha  
in ka badan inta  
aad isleedahay.**

Mar kasta oo aan marno Buena Vista Lagoon, aan doon ku raacno Harada San Marcos, aan ka kaluumaysano Batiquitos Lagoon, Ka cab biyaha kaliya, waxaan isticmaalaynaa ilaheena biyaha warta.



# **Waxaan ka ilaalin karta waraeena biyaha dhowr tilaabood oo kaliya!**

Biyaha soo raaca warteena biyaha ayaa soo qaada wasaqda sida nafaqooyinka, bakteeriyada, iyo qashinka, kaasoo sumayn kara marinadeena biyaha. **Muhiimada koowaad ee Warta biyaha ee Carlsbad waa in laga hortago wasaqda nafaqada, sida daawada beeraha tusaale ahaan.**

Marka aan nahay dadka deegaanka, waa hawl noo taala inaan nadiifino. Talaabada qof kasta ayaa isbadel wayn keenaysa.

## **Waxaad gacan ka gaysan kartaa ilaalinta warteena biyaha adoo qaadaaya talaabooyinkaan fudud si looga hortago wasaqda:**



### **Nafaqooyinka | nitrogen iyo phosphorous**

- Adeegso daawada beerta iyo sunta cayayaanka oo yar – inta badan geedaha ayaa u baahan wax ka yar cadadka lagu shubo.
- Xaaq qashinka caleenta iyo xashka geedaha. Xaqiji inaad qashinka ku rido qasaca loo asteyay.



### **Bakteeriyada | ku jirta wasaqda iyo bulaacada**

- Ka ilaali fagaagaaga qashinka xayawaanka rabaayada ah. Qaado bac marka aad wado xayawaanka rabaayada ah oo si sax ah qashinkooda ugu rid qasacyada loo asteyay.
- Daryeel sii nidaamka bulaacada ama daawaynta bulaacada. U soo sheeg dilaacyada ama daadashada bulaacada lambarka 858-505-6657.
- Si sax ah qashinka ugudar bulaacada RV adoo dhigaaya barta qashinka loo asteyay.



### **Qashinka | ayna ku jirto qashinka geedaha**

- Ku rid dhammaan qashinka qasacyada loo sameeyay oo daboolka u adkee.
- Booqo <https://wastefreesd.org/> si aad u hesho sida qashinka loogu daro ama dib loogu warshadeeyo agabka gaarka ah.

**Ismaamulka San Diego iyo iskaashatadiisa ayaa sidoo kale ka wada shaqaynaaya ilaalinta caafimaadka waraheena biyaha.**

**Haddii aad doonayso inaad xog badan ka ogaato** Warta Biyaha ee Carlsbad, booqo [www.projectcleanwater.org/carlsbad-wma/](http://www.projectcleanwater.org/carlsbad-wma/)

**Nasoo Wac si aad u Hesho Xog dheeraad ah ama aad U soo Sheegto Wasaqda Biyaha.**

watersheds@sdcounty.ca.gov ■ [www.sandiegocounty.gov/stormwater](http://www.sandiegocounty.gov/stormwater)

**1-888-846-0800**